



WAALIDIINTA

Haddii uu jiro shaki xagga wada xiriirka iyo dhibaatooyinka isdhexgalka bulshada

Ilmahaagu uu booqday xarunta caafimaadka carruurta. Inta lagu jiro balantan, horumarka wada xiriirka ilmahaaga iyo awooda is dhexgalka bulshada ayaa la baaray. Waxaanu qiimaynay in ilmahaagu qabo dhibaato xagga xiriirka ah laakiin sidoo kale ay ku adag tahay waxa aanu ugu yeerno dhexgalka bulshada.

Dhexgalka bulshada

Tusaalooyinka dhibaatooyinka isdhexgalka bulsheed waxaa laga yaabaa in ilmahaagu uusan sameynin xiriirin badan oo isha ah, uusan ka falcelin marka uu maqlo magacooda, uusan raacin waalidka marka uu wax u tilmaamayo, uusan tilmaamin marka uu rabo iyo/ama uusan ciyaar iskayeelin. /dhaadhicin (tusaale subermaarketka ama dhooliska).

U gudbinta baaritaan siiwadid ah

Jadwalka xarumaha caafimaadka caruurta waxay qeexayaan inay soo diraan tixraac si loo sii wado qiimaynta marka ilmaha loo arko in uu qabo dhibaato ah xiriirka iyo dhexgalka bulshada. Xaaladaha qaarkood, qiimeynta siiwadidda ah waxaa sameeya waalidiinta iyo adeegyada caafimaadka carruurta iyo xaaladaha kale gudbinta waxaa loo diraa adeegyada baxnaaninta carruurta iyo dhalinyarada. Kadib, ballan ayaa la balamay waxayna ku xiran tahay qeybta gudbinta loo diray, waxaa joogi doona xubno shaqaale oo kala duwan.

Ootiisamka

Shaqaaluhu waxay eegi doonaan inta lagu jiro booqashada t waa haddii ilmahaagu laga yaabo inay ku adkaato waxa loo yaqaan 'Ootiisam spectrumka'. Ootiisamka maaha cudur laakiin macnaheedu waa in maskaxdu si kale u shaqeyso. Ootiisamku waxa uu saameeyaa habka uu qofka u fikiro, ahaanshiyaha iyo la xiriirka dadka kale. Waxa lagu gartaa in ilmuhu caadi ahaan ka gaabiyay korriimadooda xiriireed iyo in aanu ilmuhu la falgelin una ciyaarin si la mid ah carruurta kale ee ay isku da'da yihiin.

Haddii aad ka shakisan tahay in ilmahaagu qabo Ootiisam, shaqaaluhu waxay soo jeedin doonaan in baaritaan la sameeyo. Sababta aan rabno in aan u ogaano cudurka Ootiisamka ee carruurta goor hore waa in aan ognahay in ay u wanaagsan tahay carruurta in ay helaan caawinaad goor hore xagga xiriirka iyo la dhaqanka carruurta kale ee ay isku da'da yihiin. Dadaallada oo dhan waa ikhtiyaari oo wakhti kasta waxaad go'aansan kartaa inaad rabin inaad sii wadato baaritaanka.

Booqo baaritaanka siiwadidda ah

Booqashada adeegyada caafimaadka waalidiinta iyo carruurta ama adeegyada baxnaaninta carruurta iyo dhalinta, shaqaaluhu waxay ku weydiin doonaan inaad u raacdo ilmahaaga baaritaanka ugu horreysa.

Su'aalo ku saabsan Ootiisamka?

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ogaanshaha cudurka Ootiisamka, waxaan kugula talineynaa meerta ku saabsan "Dawaynta Hore" ee bogga Gobolka Uppsala. Waxa kale oo jira macluumaad fiican oo ku saabsan ee www.1177.se (ka raadi Ootiisamka ee barta raadinta).

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ka dib booqashada BVC, ha ka waaban inaad la xiriirto kalkaalisada BVC.